



Isticmaalka gabbaadka dadweynaha (Väestönsuoja) iyo sida loogu gabbado

Warqaddan macluumaadka ah waxaa ay kaa caawinaysaa in aad fahamto isticmaalka gabbaadka dadweynaha iyo sida loogu gabbado.

Wakhtigan xaadirka ah Finland kama jirto wax khatar milatari ah. Sidaas darteed, looma baahna in hadda la isticmaalo gabbaadka dadweynaha. Si kastaba ha ahaatee, waa muhiim in la ogaado arrimaha aasaasiga ah ee ku saabsan gabbaadka dadweynaha iyo sida loogu gabbado. Xaaladaha caadiga ah, hoyga gabbaadka dadweynaha waxaa loo isticmaalaa bakhaar ahaan ama goobaha hiwaayadaha lagu sameeyo.

Waa maxay noocyada kala duwan ee gabbaadka dadweynaha?

Hoyga gabbaadka dadweynaha waxaa loogu talaggalay in la isticmaalo xilliyada dagaalka. Waana qayb muhiim ah oo ka mid ah ilaalinta dadka. Goobahaas gabbaadka dadweynaha waxaa ay kooban yihiin dhismo adag, nidaamka

hawo beddelka, marinada samatabaxa ee loogu talaggalay in laga baxo marka halis degdeg ah ay timaaddo, iyo agab kala duwan.

Gabbaadka dadweynaha waxaa laga helaa hantiyaha sida gaarka ah loo leeyahay, sida guryaha dabaqa ah, guryaha gaagaaban ee isku sekedda ah (rivitalo), dukaamada, xafiisyada iyo dhismayaasha warshadaha, sidoo kale waxaa laga helaa goobaha guud ee dadweynaha sida iskuullada iyo isbitaallada.

Sidoo kale waxaa jira gabbaadyo dadweyne oo guud, kuwaasoo loogu talaggalay in ay galaan dadka ku sugan magaalada gudaheeda. Waana kuwo inta badan soo buuxinaaya baahiyaha gabbaadyada dadweynaha ee magaaloooyinka waawayn.

Sidan soo socota ayaa gabbaadka dadweynaha loo isticmaalaa

Mulkiilaha dhismaha waa inuu horay u qorsheeyaa sida loo isticmaalayo gabbaadka dadweynaha. Tani waa qayb ka mid ah qorshaha badbaadinta ee dhismaha.

Goorma ayaa la bilaabayaa isticmaalka, yaase arrinkaas ka mas'uul ah?

Gabbaadka dadweynaha waxaa la bilaabayaa isticmaalkiisa 72 saacadood gudahood kaddib marka uu amarka arrinkaas ka yimaado hay'adaha dowladda. Diyaarinta waxaa samaynaaya dadka deggan dhismaha. Intaa kaddib hoyga gabbaadka dadweynaha waxaa la gelinayaa xaalad diyaarsanaan ah, si loo galo markii loo baahdo oo ay xaalad degdeg ah timaaddo.

Isticmaalka gabbaadka dadweynaha waa mid fudud, haddii si wanaagsan loo sii qorsheeyo. Waxa aad si wadajir ah uga heshiin kartaan cidda loo tababarayo si ay u maamulaan hoyga.

Waxa aad ku kordhin kartaa aqoontaada iyo waaya-aragnimadaada, adigoo akhrinaaya hagista ama tilmaanbixinta dhismaha degaanka.

Marxaladaha diyaarinta iyo isticmaalka:

- Ka saar dhammaan alaabta aan loo baahnayn, furfur qaab-dhismeedyada dheeraadka ah ee aan loo baahnayn. Nadiifi goobta.
- Calaamadee jidka laga soo galo hoyga gabbaadka dadweynaha, adigoo calaamadahaas ka soo bilaabaaya bannaanka illaa aad ka keento gabbaadka dadweynaha.
- Qalabka yaalla gabbaadka dadweynaha u diyaari in la isticmaalo:
 - waxa aad rakibtaa teendhada xiran (sulkutelta) ama hubi shaqada qolka xiritaanka
 - Buuxi haamaha biyaha kaydka ah, waxaadna samaysaa qolalka musqulaha ah
- Hubi in albaabada waawayn iyo kuwa yaryar ay si fiican u shaqeynayaan. Hubi xiriirka isgaarsiinta ee gabbaadka dadweynaha.
- Hubi marinka samatabaxa ee loogu talaggalay in laga baxo marka halis degdeg ah ay timaaddo
- Xir hawo beddelka caadiga ah ee gabbaadka
- Hubi shaqada qalabka hawo beddelka iyo qalabka kale.

Macluumaad Dheeraad ah:

suomi.fi/preparedness

pelastustoimi.fi/en/rescue-services/preparedness/civil-defence

Warqaddan waxaa ay ku saleysan tahay macluumaadka ku qoran hagaha wasaaradda arrimaha gudaha ee ku saabsan isticmaalka hoyga gabbaadka dadweynaha. Had iyo jeer raac tilmaanbixinta ama hagista ay bixiyaan hay'adaha dowladda.

Sidan soo socta ayaad u galaysaa hoyga gabbaadka dadweynaha

Hoyga gabbaadka dadweynaha waxaa la isticmaalaa oo keliya xilliyada dagaalka. Baahida is ilaalinta ama gabbaad gelitaanka waxaa loo soo sheegaa qaab digniin ah, iyo qaab ah ogeysiinta xaaladaha khatarta ah, tusaale ahaan abilkeeshinka ku jira telefoonnada gacanta ee 112. Waa muhiin in qofku si degdeg ah uu u galo gabbaadka, sababtoo ah wakhtiga u dhexeeya digniinta iyo khatarta dhabta ah waa mid aad u gaaban.



Xaggee ayaan gabbaad ahaan u aadayaa?

- Marka digniinta la maqlo, si degdeg ah u tag hoyga gabbaadka rayidka ee kuugu dhow. Qof kasta oo u baahan ilaalin ama gabbaad wuu geli karaa hoyga gabbaadka dadweynaha, haddii ay meel ka bannaan tahay.
- Calaamadda gabbaadka dadweynaha waa saddex-xagal buluug ah oo dhinacyadu isle'eg yihiin, kuna yaalla asalka midab oranji ah.
- Haddii uusan kuu dhoweyn hoyga gabbaadka dadweynaha, waxaa aad gabbaad ka dhigataa oo gashaa dhismayaasha adag ee suurtaggalka ah ee kuu dhow, tusaale ahaan qaybaha dhexe ee dhismaha. Ka fogow bannaan socodka.

Maxaan qaadanayaa marka aan galayo hoyga gabbaadka dadweynaha?

Marka aad tagayso gabbaadka dadweynaha waa in aad wadataa kaarka aqoonsiga, daawooyinka lagammamaarmaanka ah, telefoonka, lacag yar oo kaash ama caddaan ah iyo cabitaan.

U qaado hoyga gabbaadka dadweynaha:

- cunto iyo cabitaan aan u baahnayn in la kululeeyo
- agabka nadaafadda caafimaadka (hygieniatarvikkeet)
- nalka foodda lagu xiro (otsalamppu) iyo batariyo, iyo sidoo kale qalabka loogu talaggalay cabbaynta ama buuxinta telefoonka gacanta
- waxyaabo wakhtiga lagu qaato (buugaag, ciyaaro, alaabta carruureed)
- haddii loo baahdo, agabka lagu seexo habeenkii, tusaale ahaan kiisha hurdada (makuupussi) iyo gogosha lagu seexo.

Waxyaabaha loo qaadanaayo hoyga gabbaadka dadweynaha



Mar walba waa in aad wadato



Qaabka loo dhaqmaayo marka lagu jiro gudaha gabbaadka dadweynaha

Qalabka yaalla gabbaadka dadweynaha waxaa si wadajir ah u isticmaalaaya dadka ku jira gudaha gabbaadka. Gabbaadyada waawayn waxaa jooga dad si gaar ah loo tababaray. Waxaa dhici karta in gabbaadku uu noqdo mid ciriiri ah oo kulul, laakiin waa meel ammaan ah. Caadi ahaan gabbaadka dadweynaha waxaa la joogaa wakhti gaaban.

U hoggaansan oo raac hagista ama tilmaanbixinta, islamarkaana adiga iyo dadka kaleba si wadajir ah u ilaaliya

nadaafadda. Ha cabin sigaar, hana isticmaalin qalab keeni kara khatarta dabka.

Iskaashi ama wax wadaqabsi, degganaan wax u qabasho, iyo is tixgelin ayaa ka dhigaya joogitaanka gabbaadka dadweynaha mid wanagsan oo habsami leh.